# *Barnaamij-siyaasadeedka ururka Midnimo*

## Aragtida iyo hadafka ururka

**(Vision and mission statement)**

### Himilo: (Vision)

Soomaaliya oo midaysan, barwaaqo ah, muwaaddin kastana ku naaloonayo nabad, sinnaan, horumar iyo sarraynta sharciga.

### Hadafka: (Mission)

In muwaaddiniinta lagu garabsiiyo dardargelinta sidii loo heli lahaa hoggaan leh daahfurnaan iy isla- xisaabtan, horumar loo dhan yahay, lehna nabad iyo barwaaqo waarta.

### Xeerarka iyo qiyamka: (Norms and values)

- Ilaallinta iyo ku dhaqanka, diinta iyo dhaqanka wanaagsan.
- Dhawrista nabadda, xasiloonida iyo xuquuqda muwaaddiniinta.
- La xisaabtan, Daahfurnaan, karti iyo hufnaan.
- Habsami-u-adeegsiga hantida iyo agabka ururka.
- Ka madax-banaani wax kasta oo faquuq keeni kara.
- Ka madax-bannaani cid kasta oo kale.

### Farsamada lagu hanan karo hadafyada: (Strategy)

Ururku wuxuu waajibaadkiisa u gudanayaa sida hoos ku xusan:

- Hirgelinta iyo horumarinta nidaamka dimoqraadiyadeed ee xisbiyada badan
- In bulshadu ay qeyb ka noqdaan maamul iyo siyaasad loo dhan yahay
- Horumarinta bulsho rayed ah, karti leh, loo dhan yahay
- Wacyigelinta iyo sare-u-qaadidda xirfadda iyo aqoonta shaqaalaha
- Adeegga dawladdu waa in uu wada gaaraa dalka iyo dadka, si gaar ahna loola dagaalamaa saboolnimada

# *Barnaamij-siyaasadeedka ururka*

## Gogoldhig

Ururka Midnimo (Midnimo Center for Peace & Stabilty, MPS) wuxuu ka duulayaa aragti hufan oo ku aaddan xalinta dhibaatooyinka baahsan ee dalka ka jira. Dagaalkii sokeeye kuma ekayn burburkii dawladnimo balse wuxuu si weyn u dhaawacay qiyamkii, akhlaaqayaadkii iyo waddaniyaddii umadda.

Taasi waxay na dhaxalsiisey caqabadaha dalku ku sugan yahay. Tusaale ahaan:

- Faragelinta dawladaha shisheeye ay ku hayaan dalkeena iyo maamullada dalkeena .... "chapter 7 ayaa lagu maamulaa dalkeena - UN"
- In qaranimadii iyo wadajirkii dalku halis ku jiro.
- In shilling-soomaaliga oo ah astaan qaran uu gebi ahaanba suuqa baxay.
- In uusan dalku laheyn ciidan qaran oo mideysan.
- Dalkeenu ma illaashan karo xuduuddiisa, berrigiisa, baddiisa iwm
- In amnigii dalka gacanta ka baxay oo meel walba dagaallo-beeleed ka socdaan miyi iyo magaalaba.
- In awooddii dawladnimo (mid gobol iyo mid dhexe) ku soo ururtay shakhsiyaad kooban. Taasoo keentay in koox gaar ah hawlaha qaranka u maamushaan siday ugu badiso.
- In dawladdu noqotay madax-ka-nool, sababtuna tahay in saddexdii laamood ee fulinta, sharci-dejinta iyo garsoorku ay isku milmeen, dawlad goboleed iyo mid dhexe.
- In shacabku lumiyey kaalintii la-haanshaha dawladnimada, noqdeena sidii marti aan waxba ka oran karin arrimaha nolashooda, dalkooda iyo dadkoodaba.
- In heshiiska bulshada (dastuurka) iyo axdi-dhaqameedyada (social contract/dastuurka) hogaamiyeyaashu sidey ugu badiso ka yeelaan. Orah English ayaa oraneysa “authoritarian leaders rewrite history to control the future.”

# *Barnaamij-siyaasadeedka ururka*

- In musuqmaasuqu uu si xad-dhaaf ah ugu baahay dalka, ilaa hantidii dalka iyo canshuurihii shacabka lagu takrifalo.
- Ka dib markii siyaasiyiinu ay gacandhaaf ku sameeyeen hawlihii dhaqanka waxay taasi dhalisay in odayaashu si habsami ah u gudan waayaan waajibaadkoodii.
- Dhallinyaradeena si xad-dhaaf ah ayey dalkeena uga haajirayaan, waxaa dhab ah in raad xun ay ku reebeyso dalkeena iyo horumarkiisa ...

Haddaba maxaa noqon kara xal looga badbaado dhibaatooyinka kor ku qeexan?

Ururka Midnimo wuxuu aaminsan yahay:

1. Ugu horayn, in la wada garowsado jiritaanka dhibaatooyinka kor ku xusan iyo kuwo kale oo badan.
2. In muwaaddiniinta Puntland yeeshaan wadatashi guud oo aan cidna dibadjoog (mucaarad) ka ahayn.
3. In wadatashigu jawaabo sax ah u helo dhammaan su'aalaha la hordhigo kuwaas oo heer walba leh (dawlad iyo rayadba, P/L iyo DFS)
4. Inay wadatashiga saldhig u noqdaan:

   a. Daacadnimo dhab ah
   b. Bisayl
   c. Fogaan-arag
   d. Isu-tanaasul
   e. Xog-ogaalnimo
   f. Aqoon durugsan oo maarayn karta culayska jira
   g. Iskutashi iyo hal-abuur
   h. Hal-adayg iyo dhiranaan
   i. Mudnaan kala hormarin hawleed

Haddii waddadaan la maro, ururka Midnimo wuxuu aaminsan yahay in meeraysiga, mugdiga, maan-dayoowga, firirka, nuglaanta, hubanti-la'aanta iyo cabsida joogta ah xal loo helikaro. Balse waxaa taas ka sokeeya shaqo badan oo aan sahlaneyn. Waxaan shaki ku jirin in Puntland oo wadatashatay ay intaas iyo ka badan awooddo, waayo-aragnimmana u leedahay inay hormood u noqoto Soomaaliya.

Mar haddii aynu qeexnay halka ay xaaladda dalku marayso, waxaa hubaal ah in loo baahan yahay in la helo barnaamij ururku uu uga qaybqaadanayo xallinta

dhibaatooyinka aan kor ku faahfaahinay. Barnaamijka ururka Midnimo waxaa saldhig u ah:

## A. Puntland:

### 1) Qorshaynta iyo jaangoynta masiirka:

a. In la sugo nabadgelyada Puntland si loo helo xasilooni waarta oo dhan kasta ah.
b. Si qodobka koowaad looga guulgaaro, waa in Puntland laga abaabulo shirweyne wadatashi oo lagu xaliyo xaaladaha hortaagan xasiloonida iyo horumarka dalka, laguna go'aamiyo qorsheynta iyo fulinta himilooyin wax ku ool ah oo dalka gaarsiiya amni, horumar iyo barwaaqo.

### 2) Amniga iyo Xasiloonida Puntland:

a. Difaaca xuduudaha iyo amniga shacabka (miyi & magaalaba) waxaa mas'uul ka ah dawladda Puntland.
b. In Puntland hormood ka tahay difaaca dalka iyo qarannimada soomaaliyeed.
c. Waxaa Puntland ka reebban fariisimo ciidamo shisheeye.
d. Waxaa Puntland ka reebban jiritaanka fariisimo shirkado iyo ciidamo shisheeye oo aan dastuurka waafaqsaneyn.
e. Waxaa reebban in ciidamo shisheeye ay ka duulaan badda, dhulka iyo hawada Puntland.

### 3) Hannaanka dimoqoraadiyadda (qof & cod):

a. In Puntland laga hirgeliyo hannaan dimoqoraaddi ah, ee ku dhisan doorasho xor iyo xalaal ah, sinnaan iyo caddaalad.

b. Baahinta iyo daadejinta awoodda dawliga ah (Devolution of Power): In awoodaha dawliga ah la daadejiyo oo ay gobollada, degmooyinka iyo deegaanadu ay si xor iyo xalaal ah u doortaan dawladahooda.

c. Maamulka doorashooyinka: In degma kasta ay leedahay guddi doorasho oo madax-banaan. Diyaarinta nadaamka, shuruucda iyo habraaca doorashooyinka waxaa guud ahaan mas'uul ka ah guddiga doorashooyinka Puntland(PEC), halka maamullada gobollada, degmooyinka iyo deegaanaduba ay raacayaan sida sharcigu dhigayo.

4) **Caafimaadka:**

**a)** Quudinta, nafaqeynta iyo hubanti-la'aanta cunnada:

Soomaaliya waxaa jira nafaqo xumo daran, iyadoo 1,7 malyan oo caruur ah, da'dooduna ka yar tahay 5 sano, ay halis ku sugan yihiin. Cunno-yaridu waxay saameyn ku leedahay 4 malyan oo qof, taasoo sababta dhibaatooyin caafimaad darro baahsan [1].

**b)** Cudurrada ka dilaaca dalka:

Cudurrada shuban-biyoodka iyo jadeecada ayaa ah kuwa joogtada ah waayo waxaa dalka ka jira nadaafad-xumo iyo biyaha nadiifka ah oo xaddidan. Nidaamka caafimaadka ayaa ku dhibaatoonaya in uu si la taaban karo u maareeyo cuduradan [2].

**c)** Rugaha caafimaadka oo xaddidan:

Dagaallada oo muddo dheer socday ayaa wiiqay kaabasyaashii caafimaadka Soomaaliya. Gobollo badan ayaan laheyn xarumaha caafimaadka aasaasiga ah iyo sidoo kale shaqaale caafimaad oo tababaran [3].

**d)** Hooyada iyo dhallaanka:

Dhimashada hooyada iyo dhallaanka ayaa aad u sareysa waayo dalka kama jiraan daryeelka caafimaadka ka hor iyo ka dib dhalmada. Waxaa sidoo kale dalka ka jira in marar badan hooyada foolaneysa aysan helin shaqaale leh xirfad umuliso [3].

Haddaba sidee baa wax looga qaban karaa dhibaatooyinkaas?

- Xoojinta caafimaadka aasaasiga ah:

  Waa in diiradda la saaraa dhisidda nidaam xoojinaya caafimaadka aasaasiga ah, si uu u bixiyo daryeel caafimaad oo dhameystiran, tusaale ahaan adeegyada ka hortagga, daaweynta iyo soo-kabashada. Tani waxay lug ku leedahay tababarka shaqaalaha caafimaadka iyo hagaajinta kaabayaasha caafimaadka [3].
- Sare-u-qaadista, la socodka iyo ka jawaab-celinta cudurada:

  Hirgelinta nidaam wanaagsan oo kormeeraya cudurrada, si wax looga ogaado, loogana jawaabo cudurrada si degdeg ah. Arrintani waxay qeyb ka tahay ololaha tallaalka, wacyiglinta nadaafadda iyo helitaanka biyo nadiif ah [2].
- Horumarinta adeegyada caafimaadka hooyada iyo dhallaanka:

  In la kordhiyo helitaanka daryeel caafimaad ka hor iyo ka dib dhalmada. Waxaa muhiim ah in tababar joogto ah loo fidiyo shaqaalaha caafimaadka. Sidoo kale waa in la hubiyaa in

rugta hooyada iyo dhallaanku ay ka hawlgalaan shaqaale xirfad u leh hawlahaasi [3].

- Wax ka qabashada nafaqo-darrida:

In la hirgeliyo barnaamijka nafaqo-darrida ee bartilmaameedsanaya dadka nugul, gaar ahaan caruurta iyo haweenka uurka leh. Sidoo kale in la bixiyo gargaar cunno iyo in la taageero dadaallada horumarinta beeraha si loo hagaajiyo amniga cunnada [1]

Wax ka qabashada meelahan muhiimka ah, Soomaaliya waxay ka sameyn kartaa horumarro la taaban karo oo lagu hagaajinayo nidaamka daryeelka caafimaadka iyo guud ahaan daryeelka caafimaadka dadweynaha.

## 5) Waxbarashada:

Ururka Midnimo wuxuu aaminsan yahay in waxbarashadu aasaaskeedu yahay in caruurtu bartaan sida loola noolaan karo bulshada. Waxbarashadu waa arrin la xiriirta xuquuqaadka uu ibnu-aadamku leeyahay. Qofku in uu barto akhrinta, qoridda iyo xisaabinta waxay u fududeyneysaa in uu muwaaddinku si hufan uga qeybqaato horumarinta bulshada.
Ururka Midnimo wuxuu aaminsan yahay in caruurta gaartay da'da waxbarashada ay xaq u leeyihiin helitaanka waxbarashada aasaasiga ah oo lacag la'aan ah. Ubadka oo la maalgashado waxay saldhig u tahay horumarka bulshada iyo dalkaba.

Ururka Midnimo wuxuu dardargelinayaa:

a) Mideynta manhajka waxbarashada aasaasiga ah.
b) Tayeynta iyo kormeerka xarumaha waxbarashada ee dalka, sida iskuullada, machadyada iyo jaamacadaha.
c) Horumarinta iyo yagleelidda dugsiyada farsamada sida:
    - Kaluumeysiga iyo maareynta badda.
    - Machadka tababarada kalkaaliyeyaasha caafimaadka.
    - Machadka xanaanada iyo horumarinta xoolaha iyo daaqa.
    - Machadka barashada beeraha iyo deegaanka.
    - Machadka barashada xisaabaadka, cabiraadda iyo maareynta.
    - Machadka tababarka macalimiinta.

## 6) Badbaadada iyo daryeelka deegaanka:

Illaalinta iyo dhawrista deegaanka waa saldhigga dhaqaalaha Puntland iyo guud ahaan

Soomaaliya, maadaamma wax soosaarkeenu ku tiirsan yahay beeraha, xoolaha iyo kalluunka. Sidaa darteed waa in:

a. Laga hortagaa waxyeeleynta deegaanka sida xaalufinta, dikheynta, sumeynta, nabaadguurka, dhallanrogga iwm
b. Deegaanku uu yeesho adeeg badbaadiya oo daryeela.
c. La helo shuruuc u degsan ilaalinta deegaanka iyo hay'ad qaabilsan hawshaasi. Sidoo kale waa in ay jiraan xirfadleyaal aqoon u leh hawlaha daryeelka deegaanka.
d. Uu jiro agab ay ku shaqeyn karaan xirfadleyaasha fulinaya ilaalinta iyo daryeelka deegaanka.

7) **Horumarinta dhaqaalaha:**

Maamulka khayraadka dalka – in maamul adag loo sameeyo ilaalinta iyo maaraynta khayraadka dalka si loo xakameeyo boobka ku socda Soomaaliya.

a. In la abuuro awood shaqaale (capacity) oo karti iyo xirfad u leh horumarinta dhaqaalaha iyo ka faa'iideysiga kheyraadka dalka si ay iyagu bulshada ugu hagaan tubta toosan ee horumarinta dhaqaalaha dalka.

b. Kobcinta iyo horumarinta dhaqaalaha Puntland waxaa saldhig u ah khayraadka dabiiciga ah sida kalluunka, beeraha, macdanta, saliidda ama gaaska, suuq-geynta xoolaha iwm. Sidaa darteed waa in la dardargeliyo ka faa'iidaysiga khayraadka dabiiciga ah si loo hirgeliyo shaqo-abuur baahsan, loona horumariyo adeegyada muhiimka u ah bulshada sida waxbarashada iyo caafimaadka.

c. Kaabayaasha dhaqaalaha: Xeebaha Puntland waxaa mara dariiq-mareenka maraakiibta, diyaaradaha, qalabka isgaarsiinta internet-ka iyo saterlaatyada ee halbowlaha u ah ganacsiga adduunka. Si looga faa'iideysto fursaddaas baaxadda leh, waa in aaggaas ay yeeshaan marsooyin iyo gegooyin diyaaradeed oo xuddun iyo saldhigba u noqon kara ganacsiga adduunka, bixisana adeegyada ay u baahan yihiin gaadiidkaas. Arrintani waxay suurtagelineysaa kobcinta dhaqaalaha dalka.

d. Beeraha: In la hirgeliyo barnaamij ku aaddan tabaca dhul-beereedka. Si taa looga guulgaaro waa in la helo dad aqoon u leh waxsoosaarka beeraha, waraabka, farsamada teknoolijiyada iyo horumarinta beeraha. Ujeeddaduna waxay tahay in dalkeenu yeesho wax-soosaar ka badan baahidiisa gudaha.

## *Barnaamij-siyaasadeedka ururka*

e. Tamarta: Waa in dalku yeesho tamarta waarta ee laga dhaliyo hawada, qoraxda, biyaha iyo dalagga (renewal energy) si ay u hormariso dhaqaallaha iyo nolosha dalka. Haddaba si tamarta waarta ay suurtagal u noqoto waa laga maarmaan in la dhiso awood shaqaale oo karti iyo xirfad u leh hirgelinta hawshaasi.

f. Dalxiiska: Cimillada badda, xeebaha iyo buuraha ee illaah ku maneystay Puntland waa mid u diyaarsan dalxiis aan kala go'in sannadka oo dhan. Taas waxay suurtagelin kartaa shaqo-abuur baaxad leh iyo kobcinta, horuminta iyo bullaalka dhaqaalaha dalka.

g. Xanaanada xoolaha: Xooluhu waa lafdhabarta dhaqaalaha dalka. Sidaa darteed waa in dalku yeesho barnaamij dhameystiran oo lagu horumarinayo xanaanada xoolaha. Tusaale ahaan; tarranka, bedqabka, kobcinta, xanaaneynta, suuqgeynta iyo adeegyada kale ee lagama maarmaanka u ah xoolaha.

h. Horumarinta biyaha: Dalka waxaa ka jira biyo-yari baahsan oo saameysay nolosha una baahan xal degdeg ah. Sidaa darteed Puntland waa in ay hirgeliso barnaamij dhameystiran oo buuxiya baahiyaha dadka, beeraha, xoolaha, dhismaha, warshadaha, dalxiiska, tamarta iwm.

i. Maamulka xiriirinta dhaqaalaha: In la xoojiyo barnaamijka suuqgeynta waxsoosaarka iyo adeegga.

### 8) Dawlad-wanaagga dalka:

a. Hoggaanka dhaqanka Puntland waa tiirka saldhigga u ah ammaanka iyo xisilloonida bulshada Puntland (miyi & magaalaba). Kaabidda iyo taakuleynta hoggaanka dhaqanku waa u muhiim ururka.

b. Ururka Midnimo wuxuu aaminsan yahay kala madax-bannaanida laamaha dawladda sida xeer-dejinta, garsoorka iyo fulinta.

c. Sarraynta iyo u hoggaansanaanta dastuurka iyo shuruucda u degan Puntland waxay khasab ku tahay muwaaddiniinta oo idil. Ururka Midnimo wuxuu aaminsan yahay in dalka guud ahaan meel kasta oo ka mid ah laga hirgeliyo laguna dhaqo dastuurka Puntland si bedqabka muwaaddinka loo sugo, loona dabar-gooyo colaadaha qabaa'ilka.

d. Maamulka dhulka iyo degaanka: Dhulka waxaa ka mas'uul ah dawladaha Puntland iyo federaalka, lahaanshaha dhulkana waa in loo maraa waddo sharci ah.

e. Ururka Midnimo wuxuu aaminsan yahay saxaafad madax-bannaan oo u gudata waajibaadka warbaahineed (screen, papers and broadcast) si waafaqsan dastuurka iyo sharciyada u deggan saxaafadda.

f. Taabbagelinta heykalka dawliga ah: Ururka Midnimo wuxuu aaminsan yahay dardargelinta xoojinta maamulka iyo dhismaha laamaha dawladda kuwaas oo makaab u ah horumarka dhaqaalaha dalka iyo nolosha shacabka:

1) Tayaynta saddexda gole (garsoorka, xeer-dejinta iyo fulinta) – in la helo dad aqoon sare, xirfad iyo waayo-aragnimo u leh maamulka hay'adaha dawliga ah.

2) Hanti-dhawr madax-banaan – Hanti-dhawrku waa hey'ad dastuuri ah oo u baahan hawl-wadeeno iyo shaqaale khibrad u leh gudashada xilka hey'adda. Hay'adani waxay mas'uul ka tahay ka hortagga iyo dabargoynta ku-takrifalka hantida guud ee bulshada nooc kasta, meel kasta iyo goor kasta ay tahayba.

## B. Soomaaliya:

1) Soomalinimmada: Ururka Midnimo wuxuu aaminsan yahay in soomalinimmadu tahay isir, kumana salaysnaan karto deegaan/cinwaan. Muwaaddin kasta wuxuu xor u yahay xaqna u leeyahay inuu deegaan iyo nolol ka samaysan karo meel kasta oo dalka ka mid ah.

2) Dawladda dhexe waxay mas'uul ka tahay illaalinta midnimmada, madaxbanaanida, qarinimmada iyo danaha Soomaaliya.

3) Dib-u-dhiska dawladda dhexe:

a. Dib-u-heshiisiinta shacabka Soomaaliya: waa in laga heshiiyo khilaafaad kasta oo ka dhex jira bulshada si loo sugo dhismaha dawladnimada iyo midnimada shacabka soomaaliyeed.

b. In dawlad-gobolleedyadu si wadajir ah uga qeybgalaan xasillinta dalka iyo xoojinta/baahinta dawladda dhexe.

# *Barnaamij-siyaasadeedka ururka*

c. In dawlad-gobolleedyadu si wadjir ah u taageeraan dhisidda ciidamada iyo shaqaalaha dawladda ee matalaya dhammaan Soomaaliya.

4) Waa in ay kala madax bannaan yihiin saddexda hay'adood ee nidaamka dawliga ah, garsoorka, fullinta iyo xeer-dejinta.

5) Wax-ka-beddelka awoodaha dastuuriga ah ee dawladda dhexe ee soomaaliya waa in loo maraa hab waafaqsan sharciga.

6) In la dardargeliyo dhismaha ciidamada si loo sugo difaaca iyo xasiloonida dalka iyo qaranimada Soomaaliya. Waa lagama maarmaan in ciidamadu leeyihiin qorshe dhameystiran oo ay saldhig u yihiin istaraatiijiyad, saad, tababar iyo "morale" (strategy, logistic, training and morale).

7) Nidaamka dimoqraadiga ah ee qof iyo cod wuxuu ku hirgeli karaa si wadar-ogol ah. Dawladaha xubnaha ka ah dawladda dhexe waxay xaq u leeyihiin in ay doorashooyinkooda u madax-banaan yihiin. Dastuurka ku meelgaarka waxaa wax looga beddeli karaa oo keliya si wadar-ogol ah.

8) Nidaamka dimoqraadiga ah ee qof iyo cod waa heshiis-bulsho waana in la xaq dhawro.

9) Khayraadka dabiiciga ah: khayraadka dalku waa hanti qaran oo ka dhexeysa dhammaan muwaaddiniinta soomaaliyeed, sidaa darteedna cidna si gaar ah uguma takrifali karto. Isbeddel kasta oo lagu sameynayana waa in uu noqdaa mid laga wadatashado ayadoo la raacayo dastuurka iyo sharuucda dalka u dhigan.